TRI-CAP TRANSIT CONNECTION
SIYAASADDA ADEEGGA BAS Laga bilaabo 8-01-2017

Qeexidda Adeegga

Tri-CAP Transit Connection waa barnaamij gaadiidka baska dadweynaha oo ka shaqeeya Degmooyinka Benton, Morrison Sherburne iyo Stearns. Tri-CAP waxaa ka go'an inay inuu siiyo adeegyo gaadiid oo ammaan ah, la isku hallayn karo, la awoodi karo oo ixtiraam leh ee dadka deggan Degmooyinka Benton, Morrison, Sherburne iyo Stearns. Dhammaan basaska si buuxda ayaa loo heli karaa. Waxaanu u fidinnaa adeeg cidhif ilaa cidhif ah aagagga aanu ka shaqayno. Adeegga Dial-A-Ride (DAR) wuxuu daboolaa saddex aag: gacan 15-mayl ah Xafiisyada Tri-CAP ee Waite Park iyo meel ka baxsan aagga adeegga Gaadiidka Baska, gacan 10-mayl ah Xarunta Dawladda Degmada Morrison ee Little Falls , iyo gacan 10 mayl ah Sauk Centre City Hall gudaha Degmada Stearns oo ay kujiraan dhammaan kuwa Melrose. Dariiqyadeena Degsan-Ku-Lebedeli-Karo waxay daboolaan aagga miyiga ah sida ku qoran www.tricap.org iyagoo leh ilaa ½ mayl oo dariiqa laga weecanayo marka jadwalku oggolaado. Boos celinta hore ayaa loo baahan yahay dhammaan adeegyada basaska.

Takoor La'aanta

Tri-CAP Transit Connection ma takoori doono qofnaba. Ma jiraan xayiraado xagga dakhliga ama da'da ah adeeggan. Tri-CAP waxay bixisaa fursado loo siman yahay dhammaan adeegyada, waxqabadyada, barnaamijyada iyo shaqaalaynta iyada oo aan loo eegin isirka, midabka, jinsiga, diinta, xiriirka siyaasadeed, waddanka qofku ka soojeedo, da'da, xaaladda guurka, dhererka, culayska, naafanimada ama doorashada jinsiga. Xayawaanada adeega ee shahaadada haysta ayaa loo oggol yahay inay raacaan basaska Tri-CAP waxaanan waydiisanaynaa in rakaab kale ay iska ilaaliyaan taabashadooda ama la hadalkooda. Mulkiiluhu waa inuu la joogaa xayawaanka adeega oo uu mar walba xakameeyaa.

Saacadaha Shaqada & Xiritaanka Xafiiska

- Xarunta Maaraynta Gaadiidka 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo Isniin - Jimce; Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo
- Little Falls 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo Isniin - Jimce; Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo
- Sauk Centre 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo Isniin - Jimce; Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo
- Elk River 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo Isniin - Jimce
- Benton iyo Degmada Stearns gacan 15-mayl ah Xafiisyada Tri-CAP ee Waite Park iyo meelaha ka baxsan aagga adeegga baska
- Ka eeg websaytka ikhtiyaarrada adeegga oo faahfaahsan

Intaa waxaa dheer, farriimaha waxa lagu dhaafi karaa nidaamkayaga sanduuqa codka saacadaha shaqada kadib, maalmaha fasaxa toddobaadka iyo ciidaha, hase yeeshee farriimaha la eegi maayo ilaa maalinta shaqada ee xigta kahor. Xafiisku wuu xirnaanayaa mana jiri doono adeegga basku Maalinta Sanadka Cusub, Maalinta Martin Luther King Jr, President's Day (Maalinta Madaxwaynaha) - U xiran tababar shaqaale, Memorial Day, Independence Day (Maalinta Xornimada), Agoosto 21, 2018- U xiran tababar shaqaale, Maalinta Shaqaalaha, Khamiista & Jimcaha Thanksgiving, Maalinta Ciidda Kirismaska ka horraysa iyo Maalinta Ciidda Kirismaska. Xirnaanaha cimilada ama xaaladaha degdegga ah waxaa laga sii dayn doonaa sanduuqa codka xafiiska iyo sidoo kale raadiyayaasha soo socda: WJON AM 1240 iyo WWJO FM 98.1 gudaha St. Cloud, KASM AM 1150 iyo KDDG FM 105.5 gudaha Albany iyo KLTF AM 960 iyo KFML FM 94.1 gudaha Little Falls iyo KLCI-BOBFM 106 gudaha Gobolka Sherburne. Adeegga baska waa la joojin karaa ama wuxuu ku xaddidan yahay waddooyinka la xaaqay iyadoo ku xiran duruufaha. Xaaladaha cimilada hubin la'aanta ah ama halista

noqon karta, rakaabka ayay u taala inay ogaadaan haddii basasku shaqaynayaan. Tri-CAP ma awoodi karto inay wacdo rakaabka oo dhan ahaaneed si ay ugu wargeliso joojinta adeegga ee cimilada darteed.

Boos celinaha

Dhammaan codsiyada adeegga baska waa in la sameeyaa iyadoo laga wacayo xarunta kala-dirista gaadiidka Tri-CAP 320-251-1612 ama 1-888-765-5597. Boos celinaha waxaa la samayn karaa ilaa laba toddobaad kahor, laakiin waa in had iyo jeer la sameeyaa hal maalin shaqeed kahor. **Laga bilaabo Oktoobar 1, 2016 boos celinaha raacitaanka la sameeyo wax kayar saac kahor waxa laga qaadi doona 75 senti oo dheeraad ah halkii dhinac taas oo dheeraad ku ah nooliga caadiga ah.**

Nooliyada

Nooliga saxda ah ama habboon ee Tri-CAP wuxuu ku eg yahay fuulitaanka. Darawaliintu ma samayn karaan isbeddel.

Socdaalada bulshada "gudaha magaalada" waa $1.25 halkii raacitaan ama joogsi, iyadoo ku xidhan wakhtiga raacista ama joogsi kasta. Socdaalada miyiga (magaalo ilaa magaalo ama miyi ilaa magaalo) waa $3.00 halkii raacis ama joogsi. Joojin kasta oo dheeraad ah waxa lagu dallacayaa qiimaha ku habboon, taas oo joogsi dheeraad ah bulshada dhexdeeda uu noqon doono $ 1.25, iyo joogsi dheeraad ah ee miyi ama magaalo ilaa magaalada waa $ 3.00; hase yeeshee, joojinaha dheeraadka ah ayaa xaddidnaan doona iyada oo ku xidhan baahida rakaabka kale ee la wado.

Nooliga Ilmaha iyo Ardayga:

Marka meesha laga soo qaadayo iyo meesha loo wadaa isku mid yihiin waalid ama masuul lacag-bixiye ah ahaan:

- Ilaa laba carruur ah oo da'doodu tahay 5 sano iyo ka yar ayaa bilaash ku raaci kara.
- Ilaa laba carruur oo dheeraad ah oo da'doodu tahay 5 iyo ka yar ayaa ku raaci kara ½ nooliga caadiga ah.
- Ilaa 4 arday oo da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 17 ayaa ku raaci kara ½ nooliga caadiga ah.
- Ugu badnaan afar carruur ah iyo/ama arday ayaa ku raaci kara bilaash ama qiimaha jaban.

Carruurta ama ardayda qayb ka ah safar gaar ah ama safar kooxeed waxay bixin doonaan nooliga oo dhammaystiran umana qalmaan bilaashka ama qiimaha jaban.

Nooliga oo la bixin waayo waxay sababi kartaa joojinta adeegyada ilaa lacagta daynta ah si buuxda loo bixiyo.

Kaalmada Rakaabka

Tri-CAP Transit Connection wuxuu bixiyaa adeeg cidhif ilaa cidhif ah. Darawalada lama oggola inay galaan guriga rakaabka. Rakaabku waa inuu diyaar yahay oo uu ku sugaa jidka marka uu basku yimaado. Dhammaan rakaabka kursiga curyaanka ku fadhiga waa inay ku lahaadaan laabad gurigooda. Xaalad kasta oo jirta darawalku fuushiin maayo ama ka soo dejin maayo jaranjarooyinka. Sababo ammaan dartood, rakaabka isticmaalaya mootada nooca korontada ayaa laga yaabaa in la waydiiyo inuu u wareego kursiga baska. Dhamaan kursi curyaanada iyo mootooyinka korontada waa inay si fiican ula ekaadaan mishiinka qaadista waana in si ammaan ah loo xidhaa si basku u qaado. Rakaabku iyagaa ismaamuli doona inta basku socdo ama waxa loo baahan doonaa inuu kaaliye la socdo. Tri-CAP waxay xaq u leedahay inay qiimayso leekaanshaha kursi-curyaanka/mootada qalabkayaga kahor qaadista. Waxaanu soojeedin karnaa in kaaliye la socdo iyo/ama ka caawiyo gaynta meesha loo wado taasi oo ay kujiri karaan racista iyo dejinta iyo sidoo kale wixii hawlo kale ah ee shaqaalaha Tri-CAP ugu maleeyaan inay qaadista ammaan u tahay. Ma awoodno inaanu qaadno kursi-curyaan ama mooto aan si fiican u leekayn qalabkayaga ama aan si ammaan ah loo rari karin.

Darawaliinta looma baahna inay ka caawiyaan rakaabka alaabtooda. Alaabooyinka baska la saaro sida bushqadaha, boorsooyinka dhabarka, shandadaha, qalabka rabbaayadaha lagu qaado, iwm, waa inuu rakaabku sitaa had iyo jeer lamana oggola inuu xannibo marinada ama meesha kursi-curyaanka lagu xidho. Badbaadada rakaabka iyo darawallada dartood, baaskiiladaha ama waxyaabaha kale ee aan meel lagu xidhi karin looma oggola baska. Basasku ma sugi karaan rakaabka bangiga, boostada, iwm. Darawaladu kama tagaan baska si ay u galaan goobaha ama guryaha.

Mudada Qaadista

Rakaabku waa inay oggolaadaan toban daqiiqo labada dhinacba dariiqyada Dial-A-Ride, maadaama laga yaabo basku inuu soo qaddimo ama habsaamo jadwalka, cimilada ama gaadiidka dartii. Tusaale ahaan, haddii laguu muddeeyey 9:00 in lgu qaado, basku wuxuu iman karaa 8:50 ama 9:10 waxaana lagaa filayaa inaad diyaar ahaato. Basku wuxuu tagi doonaa kadib marka uu ku sugo saddex daqiiqo.

Xeerka Maqnaanta & Hakinta Adeegga

Maqnaansho waxay noqon karta wax kamid ah waxa soo socda:

1. Qof rakaab ah oo aan joogin halkii laga qaadi laha marka basku yimaad, oo waliba aan hore u sii burin safarka.
2. Qof rakaab ah oo go'aansda in uusan raacin gaadiidka kadib marka gaadhigu uu yimaado.
3. Qof rakaab ah oo burin ku sameeya ogaysiis 24 saac kayar.

Qofka rakaabka ah ee ku baaqda sida sare lagu sheegay waxa la siin doonaa warqad digniin ah saddex maalin shaqo gudahood laga bilaabo dambiga ee dhacdo kasta wuxuuna halis ugu jiri karaa in laga hakiyo isticmaalka adeegga iyadoo la raacayo tilmaamaha soo socda:

- Muddo saddex bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda digniinta baaqashada koowaad, laba warqadood oo digniin ah ayaa loo diri doonaa rakaabkaas isaga ah. Haddii baaqasho saddexaad dhacdo muddada saddexda bilood ah, rakaabka waxa laga hakin doonaa isticmaalka adeegga muddo 14 maalmood ah. Haddii muddada saddexda bilood ah ay dhammaadaan kahor baaqashada saddexaad, saacaddu waxay ka soo bilaabmaysaa xeerka baaqashada saddexda ah.
- Muddo 12 bilood ah oo laga bilaabo taariikhda digniinta ugu horeysay ee baaqashada keentay hakinta 14 maalmood, hakinta labaad waxay noqon doontaa 30 maalmood, ta saddexaad waxay noqon 60 maalmood wixii ka dambeeyaana waa 6 lix bilood.

Burinta Raacitaanka

Burinta raacitaanka waa in la sameeyo 24 saac kahor mar kasta oo ay suurogal tahay. Iyadoo go'aanka ay leeyihiin shaqaalaha xafiiska Tri-CAP, burinta kayar 24 saac waxa lagu qeexi karaa baaqahso waxaana la raacaa habraaca sare lagu iftiimiyey. Sida baaqashada oo kale, burinta ku celceliska ah waxay keeni kartaa hakin adeeg.

Anshaxa iyo Masuuliyadda Rakaabka

Sida waafaqsan Sharciga Minnesota ee 169.686, rakaabku waa inay xirtaan oo ay xirnaadaan nidaamka suunka kursiga ee asalka ah inta basku socdo. Qofka bixiya shahaado qoraal ah oo ka timid dhakhtar ruqsad haysta oo xaqiijinaysa inaanu qofkan awoodin isticmaalka suunka kursiga xaalado caafimaad ama naafo jidheed dartood waa laga dhaafi sida waafaqsan subd 2. Dhammaan rakaabku waxay u dhaqmi doonaan hab daacad ah had iyo jeer iyagoo tixgalinaya rakaabka iyo shaqaalaha Tri-CAP. Sigaar-cabbista ama isticmaalka waxyaabaha kale ee tubaakada, sigaarka elektarooniga ah iyo isticmaalka cuntada ama cabbitaanka waa la mamnuucay, haddii aanayn jirin oggolaansho xagga caafimaadka ah. Rakaabka isticmaalaya hadallada aan habboonayn, fara-ka-ciyaaraya, dagaalamaya, haysta daroogo sharci darro ah ama nadiifaddiisu liidato loo oggolaan maayo inuu isticmaalo adeegyada gaadiidka Tric-CAP. Tri-CAP waxay xaq u leedahay inay si joogta ah u hakiso wixii rakaab ah ee suunka kursiga xidhan waaya ama anshax darro sameeya. Xayawaanka aan adeegin waa

inay kujiraan qalab habboon. Shaadhka iyo kabaha waa loo baahan yahay in l axidhnaado. Cabitaanada khamrigu kujiro waxaa la qaadi karaa oo kaliya marka bushqadda ay kujiraan ayna waxyeelo soo gaadhin. Wixii xidhmo furan, dhalo furan ama weelka cabbitaanka khamriga leh ee kale ee furan aad ayaa loo mamnuucay. Dhammaan baakadaha iyo kiishashka tukaamaysgia waa in rakaabku aanay baska kaga tagin. Wax kasta oo baska looga tagay waxa loo tixgalin doonaa wax laga tagay waana la iska qubi. Carruurta keligood raacaya waa inay awoodaan inay ku sugaan goobta loo qoondeeyay inuu basku ugu yimaad oo ayna awoodaan inay naftooda maamulaan inta baska ay saaran yihiin. Meelaha carruurta dugsiga xannaanada laga qaado lana dhigo waa inay isku mid yihiin maalin kasta oo toddobaadka ah.

Xaaladaha ay suurogal tahay inayna ammaan u ahayn rakaabka iyo/ama gaadiidka waxa loo baahan karaa in la beddelo dariiqyada ama jadwalada. Rakaabka ayaa raaci doona tilmaamaha darawalka baska haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Faallooyinka iyo Cabashooyinka Rakaabka

Faallooyinka iyo cabashooyinka waxaa laga diiwaangelin karaa Agaasimaha Gaadiidka iyada oo la wacayo 320-251-1612 deegaanka, lacag la'aanta 1-888-765-5597, ama warqad u qorista Agaasimaha Tri-CAP Transit , PO Box 683, 1200 23rd Avenue South, Waite Park, MN 56387-0683.

Masuuliyadaha Tri-CAP

Tri-CAP Transit Connection wuxuu ka masuul yahay bixinta adeegyo gaadiid oo nadiif ah, la isku hallayn karo, ammaan ah oo waxtar leh. Ma qaadno masuuliyadda shay kasta oo baska looga tago. Tri-CAP Transit Connection wuxuu u hoggaansamaa dhammaan sharciyada federaalka, gobolka iyo deegaanka. Waxaanu joogtaynaa goob shaqo oo ka madhan daroogo iyo khamri. Tri-CAP Transit Connection wuxuu xaq u leeyahay inuu u diido gaadiidka qof kasta oo aan u hoggaansamin heerarka adeegyadan.